Mabaadi’da Sare Loogu qaadayo Sinnaanta Caafimaadka Inta lagu jiro Dhacdooyinka Illaha Xadidan

Diseembar 7, 2020

I. Taariiqda

Xaalada masiibooyinka caafimaadka dadweynaha, dalabyada daryeelka caafimaadka ayaa buux dhaafin karo awooda la heli karo ee siin karto daryeelka nolol badbaadinta imaan karto dhammaan cida u baahan.

Tan iyo 2014, bixiyayaasha daryeelka caafimaad ee Oregon, jaheeyayaasha anshaxa iyo qubarada u diyaargarowga xaaladaha degdega waxay geliyeen waqti iyo dadaal badan oo loogu qorsheysanayo xaaladaan sida lagu ogaaday gudaha hagida daryeelka masiibooyinka hore ee Oregon. Gudaha Sebteembar 2020, Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) waxay ku dhawaaqeen go’aankooda ah in aysan markale tixraaceynin ama ku tiirsanaaneyn hagida horaan loo aasaasay, sabab la xiriirto filashadeeda lagu sii wadi karo takoorida iyo sinnaan la’aanta caafimaadka. Inta lagu jiray bisha la soo dhaafay OHA waxay bilowday kulamada jaalalka bulshada iyo takhasusyada daryeelka caafimaadka si markaas loo wado abuuro nidaam cusub oo loo dhanyahay iyadoo hadafku yahay dhisidda hagida daryeelka masiibooyinka dib loo eegay oo xudun looga dhigay sinnaanta caafimaadka. Ka qeybgelid dheeraad ah iyo qorsheyn ayaa socdo si loo wada dhiso nidaamkaas.

Iyo sare u kaca dhawaan ee dacwadaha COVID-19 iyo caqabadaha awooda nidaamka caafimaadka ee soo baxayo, sidoo kale sida jawaabta u ah tallada jaalka bulshada illaa iyo hadda, waan aqoonsannahay cadaadiska baahida lagu sharaxayo oo lagu sheegayo mabaadi’da sinnaanta caafimaadka, lagu yareynayo saameynada eexashooyinkaan cad iyo maldahan, oo aan kaga hortagno takoorida waqtigaan adag. Sidaas darteed, **OHA waxay soo saarayaan bayaankaan ku meelgaarka ah ee tilmaamayo mabaadi'da sare loogu qaadayo sinnaanta caafimaadka ee goobaha Khayraadka xadidan**.

Dokumintigaan waxaa soo ogeysiiyay u doodayaasha ka imaanayo bulshada curyaanka ah, bulshooyinka midibka, jaheeyayaasha anshaxa nidaamka caafimaadka, iyo la taliyayaasha bulshada caafimaadka dadweynaha. Iyada oo tallaabadaan ku meelgaarka ah ay muhiim u tahay sheegida halisaha ka sii darida sinnaan la’aanta caafimaadka inta lagu jiro masiibooyinka hadeer, waan aqoonsannahay inay sidoo kale tahay ku celin. Qorshooyinka OHA ee xoojinta, daah furnaanta iyo ka qeybgelin iyo wadashaqeyn bulshada oo la joogteeyay si loo hormariyo hagida daryeelka masiibooyinka xudunta u ah sinnaanta mustaqbalka ee Oregon, oo ay ku jiraan wada tashiga sagaalka Qabiilo ee Faderaal ahaan Looga aqoonsanyahay Oregon. Waxaan ku dhiirogelineynaa xubnaha bulshada, hay'adaha u doodayaasha, quburada nidaamka caafimaadka, iyo qof walba ee

qabo xiisaha ku soo ogeysiinayo nidaamka lagula soo xiriirayo OHA.[1] OHA waxay bilaabeysaa inay si shaacsan u soo koobto tallada la helay iyo aqoonsashada tallaabooyinka xiggo iyo sida dadka u bixin karaan tallo isbuucyada soo socdo.

Inaga oo soo saareyno bayaankaan hore ee mabaadi'da, OHA waxaa ka sii go'naaneyso inay si degdeg ah usii wado shaqadeena isku midka ah ee lagu hormarinayo iskaashiga hagida daryeelka masiibooyinka cusub iyo jaalalkeena bulshada iyo bixiyayaasha daryeelka caafimaadka ee Oregon. Waan aqoonsannahay in shaqo balaaran na hortaalo oo aan ku soo saarno ma ahan kaliya dokumintiga hagida cusub, laakin hubinta in sinnaanta caafimaadka ay si nidaamsan u tahay muhiimada jawaabteena nidaamkeena caafimaad oo waqtiga masiibooyinka caafimaadka bulshada iyo kadib.

II. Mabaadi'da Ugu muhiimsan

Markii aad u qoondeyneysid Khayraadka gabaabsiga muhiimka ah ee wajiga masiibooyinka caafimaadka dadweynaha, sida bukaanada u baahan dareeylka heerka isbitaalka inta lagu jiro cudurka safmarka COVID-19, mabaadi'da ugu muhiimsan ee ***takoorid la'aanta,sinnaanta caafimaadka***, ***go'aan gaarista bukaanka hogaamiyo***,iyo ***xiriirka daahfuran*** waa in la isticmaalaa.

a. Takoor La'aanta

Waxaa jiro sharciyo gobol iyo faderaal ee aan mugdi ku jirin ee diyaarsan si looga illaaliyo dadka Oregon takoorida ku saleysan heerkooda illaalsan, oo ay ku jiraan jinsiyada, qowmiyada, midibka, asalka dhalashada, curyaannimada, da'da, dooqa galmada, sinjiga iyo aqoonsiga jinsiga.[2] Sida ay xoojisay bayaanka Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha Mareykanka ee heerarka masiibooyinka daryeelka iyo sharciyada xaquuqda rayidka, "xeerarka iyo sharciyada xaquuqda rayidka, oo ay ku jiraan xaalada masiibooyinka lagu dhawaaqay, lama joojin ama lagama dhaafin waqtiyada masiibada."[3] Tan iyo bilowgii cudurka safmarka COVID-19, Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha Mareykanka Xafiiska Xaquuqaha Rayidka waxay la shaqeeyaan gobolo badan si loo xaliyo cabashooyinka takoorista oo loo hubiyo in heerarka daryeelka masiibooyinka aysan ku takoorin dadka si ku saleysan heerka illaalsan.

Iyada oo go'aan gaarista sida lagu ogaaday hagida daryeelka masiibooyinka waa inay ku diyaarsanaataa sharciyada aan takoorida laheyn, waajibaadyadaan sharciga ah ma aadi karaan dhirir ku fillan. Badelkeedii, hagida daryeelka masiibooyinka waa inay sidoo kale tixgeliyaan cunsiyada nidaamsan oo muddada dheer taagan iyo sinnaan la'aanta caafimaadka ee u keenay caafimaad liito bulshooyinka midibka, bulshooyinka qabiilka, iyo shaqsiyaadka curyaanka ah. Qorshooyinka daryeelka masiibada waa inay qaataan qaabka ku saleysan sinnaanta ee qoondeynta khayraadka iyada oo la

[1] Shaqsiyaadka xiiseynayo waa inay kala xiriiraan OHA OR.CCG@dhsoha.state.or.us.
[2] Ka fiiri dokumintiga OHA "Takoor La'aanta Daaweynta Caafimaadka ee COVID-19" https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served/li2288R.pdf
[3] Fiiri https://files.asprtracie.hhs.gov/documents/crisis-standards-of-care-and-civil-rights-laws-covid-19.pdf

tixgelinayo farqiyada muddada dheer taagan iyo shaqo firfircoon ee dib u celiso sinnaan la'aantaas bandhiga iyo xeerarka illaalada takoor la'aanta.

b. Sinnaanta Caafimaadka

Sinnaanta caafimaadka waa inay u ahaataa ugu yaraan xudunta markii la tixgelinayo qoondeynta Khayraadka gabaabsiga muhiimka ah ee wajiga masiibooyinka caafimaadka bulshada sida COVID-19. Sida ay hormariyeen Gollaha Sinnaanta Caafimaadka ee Guddiga Xeerka Caafimaadka Oregon, OHA waxay ku qeexday sinnaanta caafimaadka sida xigto:

Oregon waxay aasaasi laheyd nidaam caafimaad ee abuuro sinnaanta caafimaadka markii dadka oo dhan ay gaari karaan filashadooda caafimaadka buuxo iyo fayo qabka oo aan hoos loogu dhigin jinsiyadooda, qowmiyada, luuqada, curyaannimada, da'da, jinsiga, aqoonsiga jinsiga, dooqa galmada, heerka bulshada, xaduudaha ka midka ah bulshooyinkaan ama aqoonsiyada, ama xaaladaha kale ee bulsha ahaan loo go'aansaday.

Gaarista sinnaanta caafimaadka waxay u baahantahay wada shaqeynta joogtada ah ee dhammaan gobolada iyo waaxyada gobolka, oo ay ku jiraan dowladaha qabiileedka inay sheegaan:

- Qeybinta simman ama dib u qeybinta Khayraadka iyo awooda; iyo
- Aqoonsashada, dib u heshiisiinta iyo saxitaanka taariiqda iyo cadaala darada casriga ah

Hadafka koowaad ee hagida daryeelka masiibooyinka waxay caado ahaan aheyd inay badbaadiso nololaha ugu muhiimsan ama sannadaha nolosha[4] oo dhinaca u qoondeynta Khayraadka daryeelka caafimaadka gabaabsiga ah inta lagu jiro masiibooyinka caafimaadka dadweynaha, oo ay la jiraan u sheegida si cad ee xadidan oo sinnaanta caafimaadka sida mudnaan.[5,6]Si kastaba, qaabka aanan tixgelin sinnaan la'aanta taariiqda iyo caafimaadka hadeer waxay u hogaamin kartaa sinnaan la'aan dheeraad ah oo helitaanka Khayraadka nolosha badbaadiyo iyo sinnaan la'aanta

---

[4] Daugherty Biddison, E.L. et al. (2018). Bukaano aad U badan…Qaabdhismeed shaqada ee ku Hagayo Qoondeynta Gobolka oo dhan ee Farsamada Hawo siinta Gabaabsiga ah inta lagu jiro Masiibooyinka. *Chest Journal*, 155(4) 848-854. https://journal.chestnet.org/article/S0012-3692(18)32565-0/fulltext

[5] Piscitello, G.M., et al. (2020). Kala duwanaanshaha Jaheynada Qoondeynta Neefsiiyaha ee Gobolada Mareykanka inta Lagu jiro Cudurka Safmarka fayraska Korona 2019. *Shabakada Jama Furan*, 3(6):e2012606. https://jamanetwork.com/journals/jamanetworkopen/fullarticle/2767360

[6] Berlinger, N. et al. (2020). *Qaabdhismeedka Anshaxa ee Machadyada Daryeelka Caafimaadka iyo Jaheynada loogu taloogalay Adeegyada Anshaxa Machadyada oo Ka jawaabayo Cudurka safmarka fayrsaska Korona*. https://www.thehastingscenter.org/ethicalframeworkcovid19/

caafimaadka.[7] Iyo sinnaan la'aanta qotoda dheer ee Oregon ee helitaanka caafimaadka iyo daryeelka caafimaadka, nidaam walba oo ku tiirsan kaliya ama kowdii oo badbaadinta nololaha ugu muhiimsan ama sannadaha nolosha si nidaamsan hoos loogu dhigo bulshooyinka midabada Oregon, bulshooyinka qabiilka iyo dadka qabo curyaannimada. Waa hadafka dokumintiga hadeer ee lagu taageerayo nidaamka dib u qaabeynta hagida daryeelka masiibooyinka Oregon iyo sinnaanta caafimaadka sida mabda' muhiim ah.

Qaabka sinnaanta caafimaadka wuu aqoonsanyahay takoorida nidaamsan iyo cunsiriyada waxa si qotodheer oo baahsan u saameysay shaqsiga iyo caafimaadka bulshada ka hor cudurkaan safmarka. Gudaha Oregon iyo dhaafsan, sifooyinka sida jinsiyada iyo qowmiyada, oo ay la jiraan xaaladaha horay u jiray sida curyaannimada, waxay ku xiranyihiin sinnaan la'aan adag oo helitaanka daryeelka caafimaadka loo baahanyahay, guriyeynta badbaadada iyo taageerada leh, cunto ku fillan iyo nafaqo, iyo wax badan. Markii ay wehliso halisaha si weyn kor ugu kacay oo naxdinta nidaamsan iyo cadaala darooyinka (labadaba hadeer iyo taariiq ahaan), xaqiiqahaan ayaa si joogta ah ugu darayo wiiiqida heerka caafimaadka iyo natiijooyinka caafimaadka ee shaqsiyaadka ay saameysay iyo bulshooyinka, oo ay ku jiraan cimriga nolosha. Hagida daryeelka masiibooyinka waa inay tixgelisaa oo xisaabisaa xaqiiqahaan; iyada oo aan jirin tixgelin ula kac noocaas ah, hagiida waxay badanaa sii hurineysaa oo sii qoto dheereyneysaa sinnaan la'aanta caafimaadka.

[7] Manchanda, E.C., Couillard, C., iyo Sivashanker, K. (2020). Sinnaan la'aanta Heerarka Daryeelka Masiibada. *New England Journal of Medicine,* 384(4), e16(1-3). https://www.nejm.org/doi/full/10.1056/NEJMp2011359

c. Go'aan gaarista Bukaanka Hogaamiyo

Doorbiditaanka daryeelka iyo daaweynta bukaanka, baahiyaad taageerada go'aan gaarista bukaanka, iyo baahiyada xiriirka bukaanka waa in la tixgeliyaa inta lagu jiro u qoondeynta Khayraadka gabaabsiga oo dhammaan bukaanada. Sharciga gobolka cusub wuxuu aasaasayaa in midaan ay ku jiri karto lahaanshaha dad taageero ee wehliyo bukaanka si u siiyo xiriirka, go'aan gaarista iyo taageerada jirka. Isbitaalada waa inay, sida waafaqsan sharcigaan gobolka, u ogolow bukaanka inuu u xilsaaro ugu yaraan sadex qof taageero ah oo u ogolaado ugu yaraan hal qof taageero ah inay xaadir ahaadaan waqti walba iyo bukaanka isbitaalka, haddii ay muhiim tahay in la fududeeyo daryeelka iyo daaweynta bukaanka, xitaa inta lagu jiro cudurka safmarka.[8]

***Go'aan gaarista bukaanka*.** Bukaanka wuxuu xaq u leeyahay inuu la jaal noqdo kooxdooda daryeelka ee go'aamo gaarista ay hogaamiso qiyamyadooda, iyo sida lagu jaheeyay bukaanka, ay ogeysiisay jaheyntooda hore ama POLST[9] (Dalabyada La qaadan karo ee Daaweynta Joogteynta Nolosha) (haddii ay wax jiraan). Bukaanka wuxuu sidoo kale dooran karaa inuu lahaado qof taageero ah inuu ka qeybgalo kulamadaa kooxda daryeelka haddii looga baahanyahay inay ku caawiso xiriirinta go'aamada caafimaadkooda. Haddii bukaanka la'yahay awooda go'aan gaarista oo leeyahay go'aan gaare loo ansixiyay, kooxda caafimaadka waa inay la shaqeeyaan bukaanka (illaa iyo xad suurtogal ah) iyo qofkaas inuu ogaado daryeelka ama daaweynta bukaanka uu rabayo, sida ku saleysan jaheynada hore haddii ay wax jiraan, ama doorbiditaanada bukaan ee walba bukaanka u sheegay hadeer ama huraan ugu sheegay go'aan gaaraha. Haddii bukaanka uusan u xilsaarin go'aan gaare, kooxda caafimaadka waa inay la shaqeysaa bukaanka iyo xaaskooda, lamaanaha, qoyska, ama saaxibka dhow. Dhaqaatiirta iyo hay'adaha daryeelka caafimaadka waa inay raacaan sharciga Oregon oo badelka go'aan gaarista iyo mabaadi'da go'aan gaarista la taageeray.[10] Sida hore ee suurtogalka ah ee daryeelka bukaanka oo awoodooda oo go'aan gaarista caafimaadka way yaraan kartaa, kooxda daryeelka waa inay hubisaa inaysan ku qorin diiwaanada bukaanka sida loola xiriiro go'aan gaarayaasha sida dhaqsida ah loogu ansixiyay haddii ay dhacdo xaalada go'aansashada qaabka degdega ay imaato.

Daaweynta laguma sharuudeen karo bukaanka oo yeelanayo jaheyn hormarsan, masuul, ama POLST.[11]

d. Isgaarsiinta Daahfuran

Isgaarsiinta daahfuran oo cad oo wax ku ool u ah dadweynaha iyo bukaanada marwalba waa muhiim laakin gaar ahaan sidaas inta lagu jiro masiimooyinka caafimaadka bulshada. Helitaanka warbixinta daryeelka caafimaadka loo baahanyahay waa nolol badbaadin dadkuna waa inaysan hoos ugu dhigin helitaanka

---

[8] Fiiri SB 1606, Kulanka Gaarka ah ee 1aad 2020 ee la heli karo https://olis.oregonlegislature.gov/liz/2020S1/Downloads/MeasureDocument/SB1606/Enrolled. Sharaxaado dheeraad ah waxaa lagu bixiyay sharciyada shatiyeynta isbitaalka, OAR 333-505-0030, ee laga helo: https://secure.sos.state.or.us/oard/displayDivisionRules.action?selectedDivision=1365.

[9] https://oregonpolst.org/

[10] Fiiri https://ncler.acl.gov/pdf/legal-Basics-Supported-Decision-Making1.pdf

[11] SB 1606, 1st Kalfadhi Khaas ah 2020.

waqtiyeysan iyo warbixinta caafimaadka la fahmi karo sababtoo ay tahay luuqadooda, dhaqanka, ama helitaanka cilmiga farsamada iyo taageerooyinka kale.

Daahfurnaanta waxay u baahantahay in dadweynaha la ogeysiiyo markii heerarka masiibooyin ee daryeelka la kiciyo. Dadweynaha waa inay hayaan warbixin cusub oo daahfuran ee ku saabsan qorshooyinka daryeelka masiibooyinka nidaamka caafimaadka, oo ay ku jiraan sida Khayraadka waxaa si ka duwan loogu qoondeynayaa badelkii heerarka caadiga ah ee daryeelka, iyo markii heerarka masiibooyinka laga shaqeysiiyo.

Gudaha nidaamka daryeelka caafimaadka, daahfurnaanta iyo xiriirka waqtiyeysan oo dhammaan bukaanada ama go'aan gaarahooda loo ansixiyay waa inuu dhacaa markii Khayraadka isbitaalka ay wajaheyso Khayraadka xadidan, oo ay ku jiraan nooca xadeynada iyo sida go'aamada qoondeynta Khayraadka loo sameynayo. Go’aan walba ee la xiriiro qoondeynta Khayraadka (tusaale ahaan, u qalmida neefsiiyaha ama qeybta daryeelka degdega heerka daryeelka) waa in si cad loogu sheegaa bukaanada ama go’aan gaarahooda iyo la qoro.

Dhammaan xiriirka inta lagu jrio xaalada degdega caafimaadka dadweynaha waa in lagu bixiyaa qaab dhaqan ahaan jawaab u ah oo luuqad ahaan loo heli karo oo buuxiso baahiyada shaqsiyaadka qabo curyaannimada caqliga, hormarka ama curyaannimada kale.[12] Tani waxaa ku jiri karo, laakin tani kuma xadidno inay: siinta xiriir wax ku ool ah iyada oo la isticmaalayo turjubaano u qalma, iyada oo la sameynayo fariimeysiga degdega ee legu heli karo luuqad cad iyo luuqada la doorbiday, iyada oo la isticmaalayo qaabab badan sida maqalka, daabacaada balaaran, iyo qoraalka dhow, siinta helitaanka dad taageero ah ee uu doortay bukaanka ku caawin karo hubinta xiriir wax ku ool ah, iyo hubinta websaydyada bixinayo warbixin degdega ah waa curyaannimada loo geli karo sida looga baahanyahay sida waafaqsan sharciyada xaquuqaha rayidka faderaalka.[13]

III. Isticmaalka Lagu taliyay ee Mabaadi'da Go’aansashada qaabka iyo go’aan gaarista

Inta lagu jiro nidaamka u qoondeynta Khayraadka daryeelka caafimaadka gabaabsiga, sida looga baahan karo inta lagu jiro cudurka safmarka COVID-19, OHA si xoogan loogu talliyay in isticmaalka buundeynta heerka ama go'aansashada qaabka la mid ah go'aan gaarista waa inay ku daraan mabaadi'da kor lagu tilmaamay. Intaas waxaa dheer, isbitaalada iyo bixiyayaasha daryeelka caafimaadka waa inay u hogaansamaan sharciyada iyo xeerarka mamnuuca takoorida.

Xukunka OHA, meesha aad isticmaaleysid mabaadi’da takoor la’aanta iyo sinnaanta caafimaadka, xaqiiqaha xiggo waa in laga reebaa tixgelinta markii loo qoondeynayo Khayraadka gabaabsiga masiibooyinka caafimaadka dadweynaha:[14]

---

[12] Fiiri tusaale ahaan, DOJ, Emergency Management Under Title II ee Xeerka Ameerikaanka Curyaanka ah Act ee 1 (Luuliyo 26, 2007), laga heli karo https://www.ada.gov/pcatoolkit/chap7emergencymgmt.htm.

[13] Fiiri https://www.hhs.gov/sites/default/files/ocr-bulletin-3-28-20.pdf

[14] Sida qeyb ka ah Xafiiska Xaquuqaha Rayidka’ (OCR) xalinta dacwada hore iyo todobo gobolo ee la xiriirto walaacyada takoorida, goboladaan way *ka saareen luuqad kala duwan*

Xaaladaha caafimaadka daran ama curyaannimada. Qaab walba ee daryeelka go'aansashada ee ujeedooyinka qoondeynta Khayraadka ee Khayraadka xadidan waa inaysan looga reebin bukaanada si ku saleysan cudurrada badan ee laga garanayo ama laga shakiyay ama xaaladaha caafimaadka daran/baaritaanada - oo ay ku jiraan, laakin kuma xadidna, xaalada curyaannmimada sida xaadirka caafimaadka jirka, caafimaadka maskaxda, xaaladaha caafimaadka dabeecada, caqliga, hormarka ama curyaannimada kale. Iyada oo laga reebay daaweynada nolol badbaadinta suurtogalka ah ee ku saleysan cudurada badan iyo xaaladaha caafimaadka daran, oo sababayo qarniyo dulmi ah, cunsuriyad, iyo qaababka iyo nidaamyada ay dhiseen, waxay si dheeraad ah isii hurineysaa takoorida iyo sinnaan la'aanta caafimaadka.

Cimriga nolasha. Isticmaalka sharuuda cimriga nolosha ee lagu qiimeynayo saadaalaha ama lagu buundeynayo (tusaale ahaan, “sannooyinka nolosha” ama “1 ama 5-sanno qiimeynada dhimashada”) waxay sidoo kale sii hurineysaa sinnaan la'aanta,[15] maadaama hoos u dhaca cimriga nolosha waxaa loo abuuray Dadka Midibka, dadka curyaanka ah iyo bulshooyinka kale ee quseeyo murugada sunta ah ee muddada dheer, naxdinta, hasuuqa nidaamsan, gumeysiga iyo gudbinta isirka iyo noolaha sidaas. Sababtaan darteed, cimriga nolosha sida sharuuda buundeynta waa inaan loo isticmaalin go'aan gaarista ku saabsan qoondeynta Khayraadka gabaabsiga ah inta lagu jiri masiibooyinka caafimaadka dadweynaha.

Isticmaalka Khayraadka iyo tayada nolosha. Talaabooyinka tixgelisaa isticmaalida Khayraadka ama qiimeynada tayada nolosha (tusaale ahaan, dhaqtarka u arko tayada nolosha) waa in sidoo kale laga reebaa nidaamyo walba ee loogu qoondeynayo Khayraadka gabaabsiga, sida kuwaan ay si nidaamsan dib u mudnaan siinayaan qoondeynta qeyraadyada loogu tallogalay shaqsiyaadka qaba curyaannimada hormarka, caqliga, iyo curyaannimo kale, dadka kale ee weyn, iyo shaqsiyaadka ka imaanayo bulshooyinka midibka.

Neefsiiyaha gaarka ah. Bukaanada sida daran ugu tiirsan neefsiiyaha ee ka baxsan xaalada daryeelka adag waa inaan lagala laaban neefsiiyahooda si markaas ay u kordhiso saadadka. Intaas waxaa dheer, aasaaska waxaa looga baahanyahayed neefsiiyaha waa in laga reebaa tixgelinta markii loo qoondeynayo Khayraadka gabaabsiga ee masiibooyinka caafimaadka dadweynaha.

OHA waxay ku talineysaa in qaab walba ee go'aansanayo daryeelka oo wajiga Khayraadka xadidanyihiin- sida isticmaalka buundeynta heerka ama tilmaan nidaamka si u go'aansado badbaadida isbitaalka- *waa in*:

---

heerarkooda masiibooyinka daryeelka, halkaas markale looma ogola isticmaalka xaqiiqaha sida kuwaan ku jiro qoondeynta iyo dib u qoondeynta Khayraadka caafimaadka gabaabsiga; intaas waxaa dheer, goboladaan waxay u tilmaameen bixiyayaasha inay ka saaraan sida xaqiiqaha heerarka masiibooyinka bixiyaha jiray ee qorshooyinka daryeelka. Fiiri https://www.hhs.gov/civil-rights/for-providers/civil-rights-covid19/index.html

[15] Stone JR. (2020). Cadaalada Bulshada, Kala soocida, iyo COVID-19: Iska dhaga tir sannooyinka Nolosha La keydiyay. *Daryeelka Caafimaadka,* 58(7), 579-581. https://www.ncbi.nlm.nih.gov/pmc/articles/PMC7297070/

- Laga illaaliyaa takoorida. Waxaa muhiim ah, in laga illaaliyo takoorida, go'aansashada maamuuska WAA inaysan ku saleysnaan tixgelinada anshax ahaan ama cilmi ahaan aan quseyn sida heerka dhaqaalaha bulshada, jinsiyada, qowmiyada, aqoonsiga jinsiga, dooqa galmada, asalka dhalashada, heerka socdaalka, dooqa diinta, heerka waalidnimada, kartida lagu bixinayo, daboolida caymiska, curyaannimada, ama kaliya si ku saleysan da'da.
- Isticmaal warbixinta caafimaadka aadka loo heli karo oo lagu qiimeynayo saadaalinta muddada gaaban ee bukaanka ***ee la xiriirto suurtogalnimada ka badbaadida jirooyinkooda hadeer ee ka saarida isbitaalka.***[16]
- Codso hoy macquul ah si aad u hubisid daaweyn simman ee shaqsiyaadka qabo curyaannimada ama xaaladaha xubnaha horay u jiray.
- Haddii labo bukaano ay qabaan buundooyinka mudnaanta go'aamo isku mid ah, tixgeli xulushada wareegtada ah.

Ugu dambeyntii, **qeex tayooyinka la doorbidi karo ee xubnaha kooxda go'aansashada** waa in lagu daraa qaburada ee la dagaalanka cunsuriyada iyo mabaadi'da sinnaanta, iyo balanqaadka lagu yareynayo saameynada eexashooyinka aan cadeyn iyo kuwa dahsoon iyo kala qeybinta (oo ay ku jiraan kuwa ku saleysan jinsiyada, qowmiyada, iyo curyaannimada). Xubnaha kooxda go'aanashada daryeelka caafimaadka iyo masuuliyada lagu go'aansanayo qoondeynta Khayraadka gabaabsiga waa in laga gooniyeeyaa kooxda daryeelka si toos ah ugu lugleh daryeelka caafimaadka ee bukaanka (bukaanada) go'aansadeen oo qaataan tababar oo hab dhaqamada eexashooyinka aan cadeyn iyo la dagaalanka cunsiyada.

IV. Tallaabooyinka xiggo

OHA waxay ku talineysaa in nidaamyada caafimaadka qaadaan tallaabooyinka xiggo degdega ah oo loogu darayo mabaadi'daan qorsheynta iyo nidaamyada daryeelka masiibooyinka. Intaas waxaa dheer, dib u eegista joogtada ah dib u eegista lagu xakameynayo go'aamada waa in loo sameeyaa si loo hubiyo in go'aamada daryeelka masiibooyinka la gaaro iyada oo aan jirin eexasho, iyo in kooxna aan si aan ku habooneyn aysan u saameyn qaab walba ee u hogaamiso hoos u dhigida nidaamsan ama sinnaan la'aanta caafimaadka ka daray.

OHA waxay ku dhiirogelisaa xiriirinta nidaamyada caafimaadka oo dhan oo kaashanayo jaalalka bulshada si ay u badelaan heerarka masiibooyinka ee daryeelka oo waafaqsan sinnaanta caafimaadka ee daahfurnaanta, qaab aan qaab mideysan: aqoonsanayo in dhab dhaqamada lagu xiray aad cadaalad u ahaanayaan oo ay aamini karaan bulshooyinka loo adeegayo.

---

[16] Intaas waxaa dheer saadaalinta jirooyinka hadeer ee ka saarida isbitaalka, gobolada qaar waxay u ogolaadeen tixgelinada haddii bukaan si lama filaan oo aan la soo celin karin u dhimanayo ama si tartiib ah ula jiran cimriga nolosha ee ka hooseeyo 6 bilood (tusaale ahaan, u qalma ogolaanshaha daryeelka guriga) sida ka qeyb ah go'aamada qoondeynta. Isticmaalka imaan kara ee xaqiiqdaan ee qoondeynta Khayraadka ee Oregon waxay u baahantahay sahmin dheeraad ah ee lagu tixgelinayo takoor la'aanta iyo mabaadi'da kale ee lagu tilmaamay bayaankaan.

Shaqadeena hore ee bulshada, taqasusyada daryeelka caafimaadka, iyo jaheeyayaasha anshaxa, OHA waxay rajeyneysaa inay sahmiso sida go'aansashada cabirka u gaari karto mabaadi'da sinnaanta caafimaadka "ee aqoonsanayo, dib u heshiisiinta iyo saxitaanka taariiqda iyo cadaalada darada casriga ah".[17] Afkaaraha u qalmaa sahmin dheeraad ah waxaa ku jiro laakin kuma xadidna:

- Saxitaanka dhibcaha si ay u siiso doorbiditaanada shaqaalaha muhiimka ah18 (tusaale ahaan, shaqaalaha wax soo saarka beeraha iyo cuntada, shaqaalaha daryeelka carruurta, iyo dhaafsan) ka shaqeynta shaqada halista sareyso.
- Isticmaalida dhibanaha si loo saxo sinnaan la'aanta qaab dhismeedka sida isticmaalida Aaga Tusmada Saboolnimada (ADI).[19]

OHA way aqoonsantahay in dokumintigaan mabaadi'da uu yahay muhiim laakin ku xadidan, tallaabo ku meelgaar ah. Waxaa rajeyneynaa inaan isu keeno jaalalka, bixiyayaasha daryeelka caafimaadka oo ay ku jiraan dhaqaaqtiirta daryeelka muhiimka ah, iyo jaheeyayaasha anshaxa isbitaalka ee mustaqbalka dhow, ku darida tallada ka imaaneyso bulshada si loo hubiyo hormarinta iskaashiga iyo nidaamka ku darista. Inta lagu jiro iskaashigaan, OHA waxay rajeyneysaa inay balaariso mabaadi'da dokumintigaan ku jiro iyo hormarinta sharuuda go'aanashada ee si diyaarsan loogu fullin karo wajiga xaalada degdega, Khayraadka gabaabsiga ah.

Helitaanka dukumiintiga: Shaqsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan aheyn Ingiriiska, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Xarunta Macluumaadka Caafimaadka 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsoha.state.or.us

[17] Ka timid sharaxaada sinnaanta caafimaadka OHA, bogga 1.

[18] Fiiri https://www.ncsl.org/research/labor-and-employment/covid-19-essential-workers-in-the-states.aspx

[19] Wixii warbixin dheeraad ah ee aaga tusmada saboolnimada, booqo https://www.neighborhoodatlas.medicine.wisc.edu/